| | |
|---|---|
| *5)* Maxkamada Gobolka Haygeysa, Amar Xayiraad Guri Lr: 4020106/b-6192 | 402 |
| *6)* Maxkamada Gobolka Haygeysa, Amar Xayiraad Guri Lr: 5010102p41. | 404 |
| *7)* Maxkamada Gobolka Hargeysa, Amar Xayiraad Dhul Beereed. | 408 |
| *8)* Maxakamada Gobolka Hargeysa Amar Xayiraad Dhul Beereed. | 410 |
| *9)* Maxkamada Racfaanka Hargeysa, Amar Xayiraad Dhul | 412 |
| *10)* Maxkamada Gobolka Hargeysa, Amar Xayiraad Dhul | 414 |
| *11)* Maxkamada Gobolka Hargeysa, Baafin Dacweysane | 416 |
| *12)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirikada TAYA FISHING) | 417 |
| *13)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada SAMS INTERNATIONAL TRADING COMPANY) | 419 |
| *14)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada ADEEG BUSINESS SERVICE INC (ABSI) | 421 |
| *15)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada CAALAMI GENERAL TRADING COMPANY) | 422 |
| *16)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada NATION'S INVESMENT AND MARKET COMPANY) | 424 |
| *17)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada ASKAR TRADING, TRANSPORTATION AND CONTRACTING (ASTACCO) | 426 |
| *18)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada HORSEED SOLUTION SERVICE COMPANY) | 427 |
| *19)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin WARGEYSKA FARIIN) | 429 |
| *20)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada BOOTAAN PRIVATE LIMITED COMPANY) | 431 |
| *21)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada ALWADAN GENERAL | 432 |

| | |
|---|---|
| TRADING GROUP) | |
| *22)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada SINOSOM COMPANY) | 434 |
| *23)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada HORN LOGISTIC AFRICA) | 436 |
| *24)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada BARAKO FISHING COMPANY) | 437 |
| *25)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada TAYYIB QUILITY MEAT COMPANY) | 439 |
| *26)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada RAHMAD GOLD MINING AND TRADE COMPANY) | 441 |
| *27)* Xafiiska Xeer Illaalinta Guud (Diiwaan Gelin Shirkada AOF GENERAL TRADING COMPANY) | 443 |
| ***QAYBTA SHANAAD*:** **OGEYSIISYADA** *Sooma bixin* | |


GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ★ JSL

# <u>QAYBTA KOWAAD</u>:
# XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## <u>THE PRESIDENT</u>

**JSL/M/XERM/249-1676/022013** **DATE ……30/03/13**

# <u>XEER MADAXWEYNE Lr:0305/032013</u>

## Dhaqan-galka Xeerka Wada-marista Gadiidka
## Xeer Lr. 56/2013

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-20/590/2013 ee ku taariikheysan 16/03/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Wada-marista Gaadiidka Xeer Lr. 56/2013;

<u>Wuxuu Soo Saaray</u>

Dhaqan-galka Xeerka Wada-marista Gadiidka Xeer Lr. 56/2013 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ★ JSL

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
**Head Quarter Hargeisa.**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilada**
**Xarunta Hargeysa.**

Ref: GW/G/KF-20/590/2013    Date: 16/03/2013

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Wada-Marista Gaddiidka Xeer (Lr. 56/2013)**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobada 21aad, 26aad, 38aad iyo 77aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland |
| MARKUU OGAADAY: | Baahidda way nee loo qabo in la helo xeer si hufan u nidaamiya habka wadda marista Gaadiidka, Dadka iyo Xoolahaba. |
| MARKUU KU QANCAY: | Warbixinaha ay soo saaraan sanad kasta Hay'adaha Nabadgelyada Wadooyinka Shilalka isadaba jooga ah ee maalin kasta ka dhaca wadooyinka kala duwan ee dalka. kuwaas oo sababa khasaare maal iyo mid nafeedba |
| MARKUU ARKAY: | Goaanka ansixinta Xeer Lr 56/2013 ee Golaha Wakiiladu u gudbiyeen Golaha Guurtida ee ku taariikhaysnaa 17/09/ /2012 |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer LR: 56/2013 ee Golaha Guurtida SL kuna taariikhaysnaa 05/11/2012 |
| MARKUU TIXGELIYAY | Nuxurka wax-ka-bedalkii iyo kaabistii Golaha Guurtida ku soo Sameeyeen Kuna ansixiyeen cod dhan (52) labo iyo konton cod Xeerka Wada marista Gaadiidka 05/11/2012 Xeer Lr: 56/2013 |
| MARKUU U CODEEYEY: | **Golaha Wakiiladu Xeerka Wada Marista Gaddiidka JSL. kal-fadhigii 20aad fadhigiisii 10aad ee 17/09/2012 oo ay goob joog ahaayeen (45) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.** |

qaabka ay u kalaGudbayaan Gaadiidku;

**Gaadiid:** Waxa loola jeedaa mishiin uu qof waddo oo wareegaya waddooyinka, oo ayna ku jirin mishiinada aan is wadin ee loogu talo galay in ay adeegsadaan carruurta iyo dadka curyaamiinta ah.

**Qalooc:** Waxa loola jeedaa waddo dheer ama laami, taas oo ahayn toos, aragtiduna ay soo koobmayso.

**Dalcad Hoose iyo Mid taagan:** Waxa loola jeedaa Godanka Waddada iyo Jiirta Waddada;

**Shil:** Waxa loola jeedda dhibaatadda Naf & Maal ee ay gaystaan Gaadiid

**Ciidan:** Waxa loola jeedda Ciidanka Nabad-gelyadda Waddooyinka.

**Hay'adda Caymiska:** Waxa loola jeedda Hay'adda u xil saran hawlaha Cayimiska Gaadiidka.

## Qodobka 2aad
## Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa dhammaan xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL

## Qodobka 3aad
## Ujeedada Xeerkan

Xeerkan waxa loo sammeeyay Nidaamka Wadda-marista Waddooyinka iyo sidii loo yarayn lahaa shilalka Gaadiidka, isla markaana loo ilaalin lahaa cashuurta Qaranka.

## Qodobka 4aad
## Masuuliyada Maamulka Wadooyinka

1. Waddooyinka Magaalooyinka Gudahooda waxa ka Mas'uul ah oo Maamulaya Goleyaasha Deegaanka, Mas'uuliyaddahaasna waxa ka mid ah:-

b. Dhismaha, Dayactirka, Bilicda, Iftiiminta Waddooyinka, Lambaraynta, Magac-bixinta, Calaamadaynta iyo Sharciyaynta i.w.m

t. Habaynta Goobaha Dhigashadda Baabuurta (Parking) iyo Istaamadda Gaadiidka Dadweynaha (Bus Stations)

j. Bixinta Fasaxa Liisamadda Adeegga Gaadiidka Dadweynaha (Sida Basaska, Tagaasidda, Iska-rogooyinka, Xamuulka Badeecaddaha,Booyaddaha iwm)

x. Awoodda Sharciga Ganaaxa Gaadiidka

kh. Ogolaanshaha Fasaxa Boodhadhka iyo Xayaysiisyadda waddooyinka.

d. Bixinta Ogolaanshaha Hawlaha Shaqooyinka xanibi kara isku-socodka iyo dhigishadda waddooyinka ;

r. Barnaamijyadda Wacyi-gelinta Nabad-gelyadda Waddooyinka;

s. Awoodda, Banaynta iyo Xidhidda Ku-meel-gaadh ahaan iyo Rasmi ahaanba waddooyinka hore iyo kuwo cusub, sababo Macquul ah oo la xidhiidha Horumarinta Baahiyaha danta Guud, bilicda Magaaladda iyo duruufaha kale ee leh sabab ama sababo macquul ah.

2. Mas'uuliyiinta Goleyaasha deegaanku waxay u adeegsan doonaan fulinta mas'uuliyaddaha kor ku xusan Ciidanka Nabad-gelyadda Waddooyinka.

**3.** Waddooyinka Magaalloyinka ka baxsan waxa ka mas'uul ah Wasaaradda Hawlaha Guud Guryaynta iyo Gaadiidka, Waajibaadkoodana waxa ka mid ah: -

**b.** Dayactirka, Magac-bixinta, Lambaraynta, Calaamaddaynta, Sharciyaynta Iyo iwm.

**t.** Horumarinta iyo tayayanta shuruucda Gaadiidka iyo waddooyinka Somaliland

**j.** Barnaamijyadda Wacyi-gelinta Waddooyinka Somaliland

**x.** Awoodda Sharciyadda isku-xidhka, kala-xaddaynta iyo Balaadhintaba;

**kh.** Awoodda Ilaalinta Sharciga iyo Ganaaxa gaadhiga ama gawaadhida xad-gudba.

4. Wasaaradda Hawlaha Guud waxay u adeegsan doontaa Mas'uuliyaddaha kor ku xusan Ciidanka Nabad-gelyadda Waddooyinka.

5. Cid kasta oo ku xad-gudubta Farqadda 1aad iyo Farqadda 3aad ee Qoddobkan waxa lagu ganaaxi

doona inta u dhaxaysa 50,000 - 150,000/= Sl. Shilling.

## Qodobka 5aad

## Mamcuunida/xidhida Wadooyinka ee Dawladaha Hoose

1. Duqa Magaaladdu wuxuu soo saarayaa amar sababaysan oo lagu xidhi karo waddo, marka ay timaado Xaalad deg-deg ah, sida:-

   b. Amaan-daro ama wax dhibaatayn kara Bulshadda.

   t. Baahiyo lagama maar-maan ah oo dhinaca Ciidamadda ah, iyo

   j. Waddadaasi waxay ku xidhnaan doontaa inta laga baxayo Xaaladda markaasi taagan.

3. Qof kasta oo ku xad-gudba awaamiirta ku cad Qoddobkan farqaddiisa 1aad waxa lagu ganaaxi doona **50,000/= illaa100,000/= S.L Shillings.**

## Qodobka 6aad

## Xidhidda Waddo si ku Meel-Gaadh ah

1. Xidhida waddo/waddooyinka ama qeyb ka mida Waddada si ku meel gaadh ahaana loo xidho iyadoo lagu taagayo dhisme/dhismayaal ama waxyaabo kale oo xidhaya ama yareynaya isu socodka caadiga ah ee waddo/waddooyinka lama ogalaan doono haddii ayna dhisme/dhismayaashasi lagama maarmaan u ahayn xaaladaha ku xusan *Qodobka 5aad Farqadiisa 1aad*.

2. Xidhida waddo/waddooyinka lagu xidho gawaadhi, cariishyo, buulal ama boodhadhka

x) Awoodiisa in uu kaxayn karo Gaadiidka darajada (B);

6. Codsadaha ruqsadaha lagu kaxaynayo derejadda (B) ee gawaadhida loo isticmaalo adeega dadwaynaha waa inay ku qanciyaan imtixaan qaadayaasha:-

b) Aqoontiisa calaamadaha wada marista waddooyinka iyo xeerarka maamulaya wada marista gaadiidka;
t) Aqoontiisa qalabka gaadhigu ku haboonyahay;
j) Aqoontiisa qaraxa iyo gubashada injiinada iyo hagaajintooda qaybaha kala duwan ee gaadiidka iyo habka maamul ee lagaga hortagayo laguna hagaajinayo burburka;
x) Awoodiisa uu ku kaxayn karo darajada (B) ee gaadiidka;

7. Codsadaha ruqsada darajada (C) ama (D) ee Gaadiidka waa in ay aqoontiisa aalada farsamo ku qanciyaan guddida imtixaan qaadayaasha iyadoo la eegayo:-

b) Aqoontiisa calaamadaha wada marista iyo xeerarka maamulaya waddo marista gaadiidka;
t) Aqootiisa qalabka gaadhiga ku rakiban;
j) Aqoon fiican u leeyahay hawlaha qaraxa iyo gubashada mishiinka iyo shaqadooda, iyo qaybaha kala duwan ee gaadhiga;
x) Awoodiisa in uu kaxayn karo gaadhi xamuul oo leh awooda loo cayimay xamuulada lana eegayo darajada uu codsigu la xidhiidho.
Kh) Haddii codsigu la xidhiidho ruqsada lagu kaxaynayo gawaadhida basaska, codsigu sidoo kale waa inuu ku qanciyaa imtixaan qaadayaasha awoodiisa uu kaga shaqaysiin karo biriigyada iyo

**b.** Ka hortaga iyo baadhida denbiyada la xidhiidha wada marista;

**t.** Baadigoobka farsamo ee xidhiidhka la leh shilalka waa inay haystaan ogolaansho garsoore (Warant) hadii aanay ahayn dambi faraha lagula jiro;

**j.** Hawlagalinta iyo xakamaynta wada marista;

**x.** Badbaadada wada marista.

Kh. inuu ka qayb qaato hawlgalada gargaar ee xidhiidhka la leh shilalka wada marista.

b. Adeega ciidamada wada-marista waddooyinka waxaa bixin doona Wasaarada Arimaha Gudaha, marka laga reebo goobaha degsiimooyinka (magaalooyinka), markaas adeegyadan oo kale uu bixin doono Maamulka Dawlada Hoose.

**Qodobka 107aad**

**Masuuliyiinta Gudanaya Adeega Wada Marista Gaadiidka**

1. Adeega ciidamada wada marista gaadiidka ee lagu xusay qodobka 106aad waxaa si buuxda u gudan doona saraakiisha, ku xigeenada iyo askarta qaybta Nabadgalyada Wadooyinka (Taraafikada) ee Ciidamada Booliiska Soomaaliland.

badh ganaaxa ugu badan ee loo cayimay denbigaas, waxa laga qiyaas qaadanayaa kolba sida xaalada ganaan ee qodobada xeerkani u cayimay.

4. Haddii lixdan maalmood ka soo wareegto taariikhdii lagu xukumay denbiga, denbi falaha looma ogolaan doono in la iskugu geeyo iyada oo lagu oogayo dacwad ka dhan ah.

5. Denbi falaha looma ogola in layskugu geeyo denbiyada haddii, isaga oo saraakiisha booliiska ee wada-marista uu kaga yimid amar istaagid ah, uu u hogaansami waayo amarkaa istaagista uu istaagina waayo, ama isaga oo wade ka ah gaadhi, uu diido in uu soo saaro buuga diwaangelinta gaadhiga ama ruqsadiisa kaxaynta (Driving Liscence) ama waraaqo kale oo ku waajibay wadaha sifo Xeerkani waafaqsan, wadaha waajib ay ku tahay in uu sitaa una hogaansamaa saraakiishaa amray.

6. Denbiga lagama dhigi karo ganaax oo kaliya, haddii ay ka dhalanayso dambi kale sida haduu dhinac dhaawac u gaysto waxaa laga qaadayaa talaabada sharciga ee ku haboon.

## Qodobka 109aad
## Qaadista Ganaaxyada

1. Haddii denbi lagu galay waddo ka baxsan, xadiga kasta oo uu bixiyo denbifaluhu si

# QAYBTA AFRAAD:

# AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** **REPUBLIC OF SOMALILAND**

**MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEISA** **REGIONAL COURT HARGEISA**

**MGH**

---

MGH/DFL/35/2013, HARGAYSA

Loofuliye: Cali Aadan Ibraahim

Qareen: Maxamed Maxamud Xaashi

Lagufuliye: Wasaarada Maaliyada J.S.L

Wakiil: Xafiiska Qaryaqaanka Guud ee Qaranka

## Ujeedo: Digniin 10 Cisho Ah

Maxkamada Gobolka Hargaysa:

Markay Aragtay: Gal dacwadeedka fulinta ah ee sumadiisa, iyo dhinac yadiisuba sare ku xusan yihiin.

Markay Aragtay: Arjiga codsiga fulinta ah eek u taariikhaysan 12/02/2013, ujeedadiisuna tahay in la fuliyo xukunka sumadiisu tahay MGH/DML/123/2011

Markay Aragtay: Qoraalka ka soo baxay gudida kormeerka wasaarada arimaha gudaha u dirtay oo ku

taariikheysan 17/12/2009, ee uu ka saxeexanyahay Cismaan Cabdi Ismaaciil.

Markay Aragtay: Qoraalka ka soo baxay hogaanka qorsheynta qaranka eek u taariikheysan, 15/12/2009, kuna saxeexanyahay Maxamed Baaruud Jaamac, hoganka qorsheynta ciidanka

Markay Aragtay: Qoraalka taliyaha qaybta baadhista danbiyada C.I.D, 03/04/2012, eek u saxeexanyahay, Daahir Muuse Abraar.

Markay Aragtay: Qoraalka soobaxay la taliyaha sharciga madaxwaynaha Aadan Xaaji Cali, eek u taariikhaysan 06/06/2011, wuxuuna cadeeeyey in xoolahaa uu lahaa Cali Aadan Ibaraahin.

Markay Aragtay: Qoraalka soo baxay Wasiirka Madaxtooyada, Xirsi X. Xasan, eek u taariikheysan 13/06/2012, ee uu kusaxeexanyahay Xirsi Cali X. Xasan

Markay Aragtay: Qodobada Sharci 338, 337, XHM asbaabtaas sare ku xusan awgeed waxa ay Maxkamadu soo saartay digniintan

GUUD EE

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska Axmed Dhagax

Og: - Taliyaha Qaybta Bariga Hargaysa

Ku: - Idaacada Radiyaw hargaysa

Ku: - Dhamaan Nootaayooyinka Caasimadda hargaysa

Ku: - Jormaalka Madaxa Banaan

Og: - Dhinacyada ay Khuseyso:

R/le: - Cabdi Daahir Muumin

&

R/sane: - Aadan Warsame Wacays

**Ujeedo: - Amar Xayiraad Guri Lr:- 4020106/b-6192 ee Cabirkiisu Dhan yahay 8.95X14.58Mt Kuna yaala Degmada Axmed Dhagax**

Maxkamadda Rafcaanku Waxay Idinku ku Amaraysa In aad Xayirtaan Guriga Lambarkiisu Ujeedada Sare Ku Xusan yahay In aan la iibin Karin lana Rahmi Karin Sifo kalena aan wax looga Qaban Karin Maadaama ay naga Codsadeen Wakiilka Dhinaca R/luhu Cawil Cabdi Xasan.

Waxaa loo Cuskaday QoD; - 295-202-201-303 XHM.

Sidaa darted marlabaad laydinku Amrayaa in aad Sidaa u Xayirtaan Gurigaa Ujeedada Sare ku Xusan waxaana la farayaa Idaacada Radiyow hargaysa Iyo Jaraa'idka Madaxa Banaan Iyo Dhamaan Nootaayooyinka In aad Baahisaan in uu Xayiran

yahay Guriga Labarkiisu Sare Ku Xusan yahay in aan la iibin Karin lana rahmi Kaqrin Sifo kalena aan wax looga Qaban Karin Ilaa Amar dame aad naga Helaysan.

Xaq Soore Waa Alleh

(Sahal C/laahi Xirsi)

GARSOORAHA MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA M/JEEX

(C/QAADIR MUX, ED XUSEEN)

KAALIYAHA MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA M/JEEX

**Jamhuuriyadda Somaliland**

## MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA MAROODI JEEX EE HARGAYSA

MRH/Q-MRL/04/013 Date: - 18/03/013

Ku: Taliyaha Saldhiga Booliska M/Haybe

Og: Taliayaha Qeybta Bariga Hargeysa

Ku: Idaacada Radiyaw Hargeysa

Ku: Dhamaan Nootaayooyinka Caasimada Hargeysa

Ku: Jornaalka Madaxa Banaan

Og: Dhinacay khusayso:-

R/le: - Cabdi Daahir Muumin

&

R/Sane: - Aaden Warsame Wacays

**Ujeedo:- Amar Xayiraad Guri Lr:-5010102 P 41 ee Cabirkiisu Dhan Yahay 8.95X14.58Mt kuna yaala Degmada M/Haybe**

Maxakamada Racfaanku waxay idinku ku amaraysaa in aad xayirtaan Guriga Lamberkiisu Ujeedada sare ku Xusan yahay in aan la iibin Karin lana Rahmi kari sifo kalena aan wax looga qaban Karin maadama ay naga Codsadeen Wakiilka Dhinaca R/Luhu Cawi Cabdi Xasan waxa loo Cuskadey Qod:-295-202-201-303 XHM

Sidaa darted marlabaad laydinku amrayaa in aad sidaa u Xayirtaan Guriga Ujeedada Sare ku Xusan waxaana la farayaa idaacada Radiyaw Hargeysa iyo Jaraaa'idka Madax banaan iyo dhamaan Nootaayooyinka in aad Baahisaan in uu Xayiran yahay Guriga Labarkiisu sare ku xusan yahay in aan la iibin Karin lana rahmi Karin sifo kalena aan wax loogu qaban Karin illa amar dambe ad naga helaysaan.

Xaq Soore Waa Alleh

(Sahal C/Lahi Xirsi)

Garsooraha Maxkamada Rafcaanka Gobolka M/Jeex

GARYADAANKA GUUD EE QARANKA ★ JSL

MGH/DML/69/11 HARGAYSA
20/03/13

KU: TALIYAHA SALDHIGA BOOLISKA IB/KOODBUUR HARGAYSA

OG: TALIYAHA QAYBTA BOOLISKA GALBEEDKA HARGAYSA

OG; GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL HARGAYSA

OG; DACWOODE: - CUMAR AXMED IBRAAHIM HARGAYSA

OG: QAREEN CABDULLAHI DHEGAN HARGAYSA

OG: DACWAYSANEYAAL:

1-CABDI MIRE COLHAYE ABAARSO HARGAYSA

2-XUSEEN MIRE COLHAYE ABAARSO HARGAYSA

OG: QAREEN: 1- MAXAMED CALI CABDI

2- XAAMUD XASAN COOFLE

**UJEEDO :- AMAR XAYIRAAD DHUL BEEREED KU YAAL DEGMADA ABAARSO GODGAL**

Maxkamadda gobolka m/jeex Hargaysa:

Markay aragtay: - Gal dacwadeedka Madaniga ah eek u suntan MGH/DML69/11, ee 06//03/13 Kana dhexeeya dhinacyada sare ku xusan Ujeedadiisu tahay muran dhul beereed ku Yaala Degmada Abaarso Godgal.

Markay aragtay: - Qoraalka ku taariikhaysan 13/03/2013 ee qareenada dacwaysaneyaashu Maxkamada u soo gudbiyeen taariikhda sare ku xusan. Nuxurkiisuna yahay RASAAS IYO WEERAR LALA BEEGSADAY ILMA MIRE COLHAYE, OO AH DACWAYSANEYAASHA DACWADAN. Oo dhinaca dacwooduhu kuna codsanayaan in maxkamaddu u amarto si loo hubiyo waxna looga qabto,

Markay aragtay: Qoraalka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/J Hargaysa eek u suntan MRGH/DDRL/11/2011 ee 27/02/12, Ujeedadiisuna tahay amar xayiraad ka qaadis dhul beereedka cabirkiisu dhan yahay **11211CT, iyadoo tixraacaysa** amarka Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargaysa eek u suntan MGH/67/2011 ee 20/07/2011 , kuna xayiray dhul Beereedka jihooyinkiisuna kala yahay , K/ GOBDHEER ; B/WADDADA UUDAAN; G/BANAAN ; W/ANAGAA KA XIGNA.

Markay aragtay: Qoraalka ku taariikhaysan 12/03/13 ee qareenka

dacwooduhu Maxkamadda usoo gudbiyey ujeedadeedu tahay, cabasho xayiraad lagaga faa'iidaystay dhul I dacwadi ka socoto, kuna xusay qoraalkiisa dushiisa in dacwadaasi ay ka dhammatay Maxkamada Rafcaanka isla markaana ay waxka qabadkeedana leedahay Maxkamada

Markay argtay : Qoraalka ku taariikhaysan 19/03/13 ee qareenka dacwooduhu Maxkamada u soo gudbiyey ujeedaduna tahay ,codsi xayiraad una dhigan sidan ; Anigoo ah Garyaqaan C/hi A.M Dheegsan oo ah qareenka dacwoodaha waxaan Maxkamadda sharafta mudan ka codsanayaa in ay Xayirto dhul beereedka ku yaal Godgal ee lagu muransanyahay kana dhexeeya dhinacyada sare ku xusan ,inta ay Maxkamadda dacwadu hortaalo ee ay ka garsoorayso .

Markay aragtay ; Amarka Maxkamadda Gobolka M/J Hargaysa ee ku suntan MGH/DML/69/11 ee 13/03/2013 ujeedadiisuna tahay, Amar soo xaqiijin weerar iyo rasaas rid , kaas oo aan

Taliyaha saldhiga IB/Koodbuur si buuxda uga soo warbixinin goobta uu dadka uu hayo ku soo qabtay inuu yahay dhulka ay maxkamadu soo aragtay iyo in kale .

Markay Ogaatay: xaaladda dhinacyada dacwadu ku sal leedahay colaad raagtay oo keeni karta Dhibaato culus.

Markay aragtay : Qodobka 69,293, 294, 295 X.H.M iyo dhammaanba asbaabaha sare ku xusan ; Maxkamada gobolka M/Jeex Hargaysa , waxay xayiraad saartay dhul beereedka ku yaal Deegaankaas Abaarso (Godgal) cabirkeeduna yahay 12 HEKTAR , jihooyinkeeduna kala yihiin sidan; B/wadada Uudaan. G/Banaan Doox, W/Beer. K/Dooxa Gob dheer kana xayirtay inaan dhinacyada midkoodna wax ka qaban ka hor inta aanay Maxkamadu ku kala garnaqayso lahaanshaha dhulbeereedkaas.

Sidaa daraaded waxay Maxkamadau amraysaa Taliyaha Saldhigga Booliska IB/Koodbuur in Beertaasi lagu muransan yahay aan wax hawla ah laga qaban karininta ay Maxkamadu ka soo saarayso go’aan.

ALLAA MAHAD LEH

## JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND

## MAXKAMADA GOBOLKA HARGAYSA

*MGH/DM/52/2013* *Date: 20/03/2013*

KU: Taliyaha Saldhigga Booliska ee Farawayne =Farawayne=

KU: Idaacadda Radio Hargaysa =Hargaysa=

Ku: Jaraaidka Madaxa Bannaan ee Hargaysa =Hargaysa=

Og:Taliyaha Qaybta Booliska ee Galbeedka =Hargaysa=

Og:Hogaanka Hawlaha Ciidanka Booliska JSL =Hargaysa=

Og: Dawladda Hoose ee Farawayne =Farawayne=

Og: Guddomiyaha Waaxda Farawayne =Farawayne=

Og : Garyaqaanka guud Qaranka JSL =Hargaysa=

**Ujeedo : Amar Xayiraad Dhul Beereed Cabirkiisu dhanyahay 110X242M kuna taala deegaanka Farawayne**

**M**axkamadda Gobolka Hargaysa

Markay aragtay:- Galka dacwada Madaniga ah ee sumadiisu sare ku xusan tahay kana dhexeeya dhinacyada kala

ah Dacwooda Aw Maxamed Ibrahim Axmed wakiil u yahay (Mawliid AwMaxamed Ibraahim),Dacwaysane ka Yahay Cige Cumar Axmed .

Markay argtay: Arjiga Codsiga xayiraada ee ku taariikhaysan 19/03/2013 ee uu maxkamada Usoo gudbiyey dacwoode aw Maxamed Ibrahim Axmed iyo wakiilka Mawliid Aw Maxamed Ibrahim m,Arjigaas oo ay ku Dalbanayaan in loo xayiro dhul Beereedka ku yaala Degmada Farawayne Cabirkiisuna yahay 110x242M:-

Bari………………Waddo

Galbeed ………..Beerta Cismaan Cawaale.

Waqooyi ………. Beeraha Ilma kabadhe

Koonfur ………………… Beeraha Ilma qawdhan Muuse

Sidaas daraadeed waxay maxkamaddu idin faraysaa dhulkaa Beereedkaa ku yaalla Farawayne ee tafaasiishiisu sare ku xusan tahay In la xayiray ,oo aan la iibin Karin ,La qodi Karin , la hibayn Karin , la dhisi Karin , sifo kalena aan loo isticmaali

Karin ,Ilaa amar dambe ka soo baxayo Maxakamadda Hargaysa waxaanay u cuskatay Xayiraad Qodobadda kala ah 293,294,295 XHM.

*Allaa Mahad Leh*

(Faysal C/laahi Ismaaciil)

Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Hargaysa

By: sakariye cismaan Xirsi

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Hargaysa

# Jamhuuriyadda Somaliland

## MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA MAROODI JEEX EE HARGAYSA

MRH/Q-MRL/49/013 Date: - 25/03/013

Ku: Taliyaha Saldhiga Booliska M/Haybe

Ku: Idaacada Radio Hargaysa

Ku: Jaraa'idka Madaxa Banaan ee hargaysa

Og: Taliyaha Qaybta Booliska ee Aaga Bariga Hargaysa

Og: Hogaanka Hawlaha Ciidanka Booliska JSL

Og: Guddoomiyaha Waaxda M/Haybe

Og: Garyaqaanka Guud ee Qaranka JSL

Og: Rafcaanle:- Ismaaciil Jaamac Malaw

Qareen u yahay Foosi Sh, Yoonis xasan

Og: Rafcaansaneyaal: Cabdi Gaas Cumar

2- Cabdi Kayd Halad

**Ujeedo:- Amar Xariyaad Dhul Cabirkiisu Dhan yahay 34X60Mt ka kooban 14 Baloodh Kuna yaala Degmada M/Haybe**

Tixraac Qoraalka Amarka Xayiraada ee Sumadiisu tahay MGH/DFL/31/013 ee ku taariikhaysan 21/03/013 Ujeedadiisuna tahay Amar Xayiraad Dhul cabirkiisu Dhan yahay 34X60Mt Ka Kooban 14 Baloodh Kuna Yaala Degmada M/Haybe.

Maxkamadda Rafcaanku Waxay Idinku amraysaa in aad xayirtaan Dhulka Ujeddada sare ku xusan in aan la Dhisi Karin Lana iibin Karin lana Rahmi Karin sifo kalena aan wax looga Qaban Karin Maadaama ay naga codsadeen Qareenka Dhinaca R/luhu. Waxa loo cuskadey qod, 293, 294, 295 XHM, Dhulkaas oo Afarta Jihaba ka marto Waddo.

Sidaa darted marlabaad laydinku Amrayaa in aad sidaa u xayirtaan Dhulka Ujeedada sare ku xusan waxaana la farayaa Idaacada Radiyaw hargaysa iyo Jaraaidka Madaxa Banaan in aad Baahisaan in uu Xayiran tahay Dhulkaa ujeedada sare ku xusan in aan la dhisi Karin lana iibin Karin lana rahmi Karin sifo kalena aan wax looga Qaban Karin ilaa Amar danbe aad nag Helaysaan.

Xaq Soore Waa Alleh

**(Sahal C/laahi Xirsi)**

**GARSOORAHA MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA M/JEEX**

(C/QAADIR MUX, ED XUSEEN)

KAALIYAHA MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA M/JEEX

**JAMHUURIYADA SOOMALILAND**

## MAXKAMADA GOBOLKA HARGAYSA

**MGH/DFL/31/2013** **Date:- 21/03/2013**

**KU: Taliyaha Saldhiga Booliska ee Degmada M/Haybe**
**= =Hargeysa =**

**KU: Idaacada Radio Hargeysa =Hargeysa =**

**KU: Jaraa'idka Madaxa Banaan ee Hargeysa =Hargeysa =**

**OG:Taliyaha Qeybta Booliska ee Aaga Bariga =Hargeysa =**

**OG: Hogaanaka Hawlaha Ciidanka Booliska JSL =Hargeysa =**

**OG:Dawlada Hoose ee M/Haybe =Hargeysa =**

**OG:Guddomiyaha Waaxada M/Haybe =Hargeysa =**

**OG:Garyaqaanka Guud ee Qaranka JSL =Hargeysa =**

**Ujeedo:= Amar Xayiraad Dhul Cabirkiisu yahay 34X60MT, ka kooban 14 baloodh kuna yaala Degmada M/Haybe**

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL

Markay Aragtay:- Galka Dacwada Madeniga ah ee sumadiisu sare ku xusan tahay kana dhexeeya Dhinacayda kala ah Loofuliye Ismaaciil jaamac Malaw, iyo lagu Fuliye Cabdi Gaas Cumar (Waddo), iyo Cabdi Kayd Halab

Markay Aragtay:- Arjiga Codsiga eek u Taarikhaysan 21/03/013, soona gashay Maxkamada isla taarikhdaa, soona gudbiyey Qareen Foosi Sh.Yoonis, kuna Codsanayo in la xayiro Dhulkaaa Cabirkiis yahay_**34X60MT**, kuna yaala Degmada M/Haybe Jihooyinkiisuna kala yihiin:-

Bari…………… Waddo

Galbeed…………… Waddo

Waqooyi ……………….Waddo

Koonfur…………….Waddo

Iyadoo arjigaas uu ku sheegay in Xukunkii Maxkamada Gobolka Hargeysa ka soo baxay ka rafacaan qaatay

Markay Argatey:- Asabaabta Rafacaan Qaadshada ee ku taarikhaysan 21/03/013, lagagana Rafacaan qaatay Xukunka MDH/DML/194/02.

Sidaa darted Maadama Racfaan laga qaatay Xukunkaas galkuna u gudbay Maxkamada Rfcaanka

Markay Aragtey:- Qod 294.295, X.H.M iyo Asbaababahaasi sare ku xusan oo dhan waxay Maxkamada Gobolka Hargaysa Amarysaa

1. Dhamaan Masuuliyiinta uu qoralkani sida tooska ah ugu socdo in dhulkaasi uu xayiran yahay waxana aan laga qaban Karin, lana iibin Karin, lana hibeyn Karin lana dhisi Karin, sifo kalena aan loo isticmaali Karin illa inta uu amar dambe kazoo baxayo Maxkamadan.

Alla Mahad Leh

(Faysal C/Laahi Ismaaciil)

Guddomiyaha Maxkamada Gobolka Hargeysa

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** **REPUBLIC OF SOMALILAND**
**MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEISA** **REGIONAL COURT HARGEISA**

**MGH**

---

**Date: 31/03/13**

GAARYADAANKA GUUD EE QARANKA

**Ku: Idaacada Radio Hargeysa** **=Hargeysa=**

**KU: Jara'iidka Madaxa Banaan** **=Hargeysa=**

**OG: Garyaqaanka Guud ee Qaranka** **=Hargeysa=**

**<u>Ujeedo: - BAAFIN DACWASTANE C/QAADIR CIISE C/LAAHI</u>**

Maxkamada Gobolka Hargeysa iyada oo cuskanaysa Qodobada 121, 95, XHM waxay baafinaysa Dacweystanaha magaciisu kor ku xusan yahay kaas oo Dacwad Madani ah u taalo Maxkamada Gobolka Hargeysa.

Hadaba waxa la faraya Dacweysanaha Magaciisu kor ku xusan yahay inuu Maxkamadahorteeda ku yimaado muddo (15)cisho gudohood oo ka bilaamysa maalinta laga sii daayo Idaacada Radio Hargeysa laguna qoro Jara'iidka Madaxa Banaan Hadii aad ku iman weydo mudada laguu qabtay Maxkamadu waxay kaa qaadi doontaa talaabo sharciga waafaqsan oo la xidhiidha arintaada

**<u>(Yaxye Cali Idiris)</u>**

**<u>Garsooraha Maxkamada Gobolka Hargaysa</u>**

**<u>Yusuf Axmed Iidle</u>**

**<u>Kaaliyaha Maxakamada Gobolka Haragsa</u>**

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ★ JSL

(Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban CAALAMI TRADING COMPANY. shaqadeedu tahay soo dejinta iyo dhoofinta (Export and Import) . xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 06/03/2013

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/66/2013_ 09/03/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Wargays

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Saxaafada dalka;-

**Markuu arkay: -** Qodobka 32aad ee Dastuurka Qaranka jamhuuriyada Soomaliland .

**Markuu arkay: -** Qodobka 6aad iyo7aad ee xeerka saxaafada xeer lam 27/2004.

**Markuu arkay:-** warqada ogolaanshaha ee wasaarada Warfaafinta sumadeedu tahay WWW/XW/03/2013 EE 07/03/2013 ee ay ku ogolaatay in loo diiwaan geliyo wargayskan.

**Markuu arkay:-** Codsiga uu soo qortay mulkiilaha Wargayska Maxamuud Cabdi Jaamac oo waafaqsan shuruucaha Xeerka saxaafadda dhigaayo oo balan qaadaya isaguna dhiniciisa in uu hogaansami doono xeerka saxaafada sida uu qabo qodobada 10 ilaa 27aad .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

(Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban AL-WADAN GENERAL TRADING GROUP. shaqadeedu tahay Dhoofinta iyo soo Dejinta(export and Export) . xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 12/03/2013

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/72/2013_ 13/03/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

